

Leenka cusub ee METRO G

Rice Street iyo Robert Street waxay dhawaan yeelan doonaan gaadiidka dheereeya

Leenka METRO G waa leen Bus Rapid Transit (BRT) kaas oo ku bixin doona adeeg gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo Rice Street iyo Robert Street. Basaska BRT iyo booteejoojinku waa kuwo raaxa leh oona sahlan in la isticmaalo.


Leenka METRO G wuxuu dhex mari doonaa Market Place Drive iyo Little Canada Road ee ku taala Little Canada; Rice Street ee ku taala Little Canada, Maplewood, Roseville, iyo St. Paul; Cesar Chavez Street iyo State Street ee ku taaka St. Paul; Robert Street ee ku taala St. Paul iyo West St. Paul, iyo Mendota Road ee ku yaala West St. Paul iyo Inver Grove Heights.

Metro Transit waxay dhisi doontaa oo furi doonta leenka G laba qaybood si ay si fiican ula shaqeyso dhismaha wadada ee ka socda aaggaas.

Wajiga 1aad waxa ku jiri doona qaybta waqooyi ee Leenka G ee ka imanaya Little Canada Transit Station tagayana Robert & Kellogg oona ku yaala badhtamaha magaalada St. Paul.

Wajiga 2aad waxa ku jiri doona qaybta koonfureed ee Leenka G oona ka imanaya Robert & Fillmore ilaa Xarunta Dakota County Northern Service Center.

Ka eeg khariidad faahfaahsan barta metrotransit.org/g-line-project



Jadwalka Mashruuca Hordhaca e (waa la bedeli karaa)

• 2022-2024

QORSHAYNTA

• 2024-2025

INJINEERNIMO

• 2026-2028

DHISMO

CIDA LAGALA XIRIIRAYO MASHRUUCA:

Nasser Mussa

GLine@metrotransit.org

612-618-0277

T MetroTransit
metrotransit.org/g-line-project

Nidaam Gaadiid Bas oo Mashquul badan: Gaadiid dhaqso badan, la isku halayn karo, oo raaxo badan

Metro Transit waxa ay horumarinaysaa shabakada leenanka bus rapid transit (gaadiidka mashquulka badan ee baska) ee gobolka Twin Cities. Habkan wax ku oolka ah ee loo dedejiyo adeegga ayaa si weyn u wanaajinaya khibradda macmiilka waxayna caddaysay inay soo jiidato dad badan si ay si joogto ah u isticmaalaan gaadiidka.



Saldhigyada xaafadaha oo leh adeegyo

Saldhigyada waxaa lagu qalabeeyay sifooyin loogu talagalay waayo-aragnimo badbaado iyo raaxo leh, oo la mid ah tareenka korontada ku shaqeeya.

- NexTrip, waqtii saxda ah ee imaanshaha iyo macluumaadka tagista
- Kulaylka la rabo, nalka amniga, iyo isgaarsiinta xaaladaha degdeggaa ah
- Near-level boarding – ugu lugee baska adigoo wax jaraanjaro ah u fuulin
- Dhigashada Baaskiilkha iyo haraaga qashinka ah

Joogsiyo xadidan, adeeg joogto ah

BRT waxay shaqayn doontaa 10kii daqiqoba mar inta badan maalinta iyada oo saldhigyo ku leh 1/3 ilaa 1/2 mayl kasta.

Sida qorshayntu u socoto leen kasta, Metro Transit waxay qiimeyn doontaa suuqa iyo baahida loo qabo adeegga baska deegaanka ee dheeraadka ah ee meelaha ku teedsan waddada.

Bixinta qiimaha safarka kahor inta aan la gaarin joogsiyada degdega ah

Si aad dhakhso ugu gasho albaabada oo dhan, basaska BRT ma qabaan sanduuqyada lacagta lagu rido. Macaamiishu waxay iibsan doonaan tigidh ama waxay ku dhufan doonaan Go-To Card ee laga helo saldhigga, sida tareenka korontada ku shaqeeya. Kormeerka lacagta waxa samayn doona booliska Metro Transit.

Kaabayaal cusub si loo kordhiyo xawaarah

Marka lagu daro saldhigyada la hagaajiyay iyo kala dheeraynta joogsiga ballaaran, Metro Transit iyo la-hawlgalayaasheeda ayaa sahaminaya fursadaha si ay xadadkan BRT uga dhigaan mid aad u dheereeya. Doorashooyinka waxaa ka mid ah:

- Mudnaanta ishaarada si aad u sii socoto; basaska waxay "weydiisan karaan" nalalka cagaaran ee hore ama fidsan ee isgoosyada qaarkood
- Jidadka baska-kaliya ee ku teedsan qaybo ka mid ah leenka si basaska looga ilaaliyo taraafikada